

## **Fariinta Kormeeraha Guud kuna socota Qoysaska & Shaqaalaha: 8/19/2022**

Bulshada CCS ee Qaaliga ah,

Bilowga sanad -2022-2023 ayaa waxaa ka harsan maalmo yar, waxaana ogahay in wali ay jirto heer hubanti la'aan ah oo ku aadan bilowga jadwaleysan ee dugsiga sababtoo ah wadahadalada usocda Ururka Waxbarashada Columbus (CEA). Muhiimadeena ayaa weli ah u adeegista ardayda, qoysaska, iyo dhammaan bulshadeena CCS.

Haddii maalinta koowaad ee dugsiga ee ad 24-ka Agoosto ay ka dhacdo fasallada ama meel ka baxsan dhismaha oo ah internet-ka/onlaynka, rajadayda iyo xiisahayga sannad-dugsiyeedka kale ayaa weli ah mid sarreysa.

Marka aan sii wadno inaan u diyaargarowno xaalad kasta, taageerada aad ka heli karto [Bandhigga/Carwada Ilaha/Khayraadka Qoyska \(Back-to-School Family Resource Fair\) Back-to-School Family Resource Fair](#) ee Sabtida ayaa aad uga sii muhiimsan. Marka laga soo tago iskaashiga/bah-wadaagta ku saabsan agabka/ilaha ku-noqoshada dugsiga, bulsha weynta Columbus waxay sidoo kale u kacday/u-istaagay sidii ay u bixin lahayd Xarumaha Fidinta Waxbarashada iyo taageerada goobaha cuntada ee ardayda haddii ay dhacdo in aan bilowno sannad-dugsiyeedka 2022-2023 oo ah internet-ka/onlaynka.

Waxaan ku dhiirigelinayaa qof walba inuu soo booqdo [xarunteena Dib-Ugu-Noqoshada-Dugsioga Hub \(Back-to-School Hub\)](#) si loo helo wararkii ugu dambeeyay oo ku saabsan sanad-dugsiyeedka cusub, oo ay ku jiraan macluumaadka iyo agabka/ilaha [gorshooyinka furitaanka beddelka ah \(alternative opening plans\)](#) haddii ay timaado xaalad ah shaqo joojinta CEA ay dhacdo.

Waxaan ku rajo weynahay in aan soo dhawaynayno macallimiinteena iyo ardaydeena Arbacada, laakiin sidoo kale waxaan ognahay masuuliyada na saaran inaan u adeegno ardaydeena iyo qoysaskeena iyada oo aan oo kala eegaynin.

Si daacad ah,

Talisa Dixon

Kormeeraha guud/gudoomiyaha, Dugsiyada Magaalada Columbus